

Mamnuucid gebi ahaanba dab shidida ah oo ka jirta dhamaan Östergötland

Iyadoo ay sabab u tahay kuleylka wakhtiyadan dambe iyo qalaylka iminka khatarta dabka aad ayay u badantahay dhamaan gobolka oo sidaas darteed waxaa jirta mamnuucid gebi ahaanba ah dhinaca dab shidida.



Xilliga mamnuucid gebi ahaanba dab shidida:

- waa mamnuuc in dab lagu shido duurka iyo dhulka xitaa jardiinooyinka guryaha filooyinka
- waa mamnuuc in qalab farsamo dab lagu isticmaalo banaanka
- waa mamnuuc in wax lagu dubto goobaha joogtada ah ee diyaarsan (dhismayaasha ah shamiitada, dhagaxa iyo wixi la mid ah) iyo dhulka filooyinka ah dubitaankooda (dhuxul-/gaas-/koronto-/)

Xilliga mamnuucid dab shidida waxaa lagu talinayaa:

- in aan sigaar lagu cabin duurka iyo dhulka
- in makiinaado aan lagaga shaqayn duurka iyo dhulka, kuwaas oo keeni kara dhimbiilo ama kuleyl badan (matorada miishaaraha, makiinadaha qalitaanka xoolaha, makiinadaha hagaajinta dhulka banaanka ah iyo wixi la mid ah.

Maamnuucida dabshidida waxay u shaqaynaysaa sii socod ah. Warbixinta ku saabsan xilliga mamnuucid la joojinayo waxaa lagu daabici doonaa bogga intarnatka ee Maamulka Gobolka <http://www.lansstyrelsen.se/Ostergotland>.

